


CODKAYGA, WAALISKAYGA

Hagahaaga ku saabsan codaynta Doorashada gollaha
barlamanka (Senedd) ee Wales ka 2026, Khamiis, 7-da May



YAA CODDEYN KARA?



Waxaad cod ka dhiiban kartaa doorashada gollaha barlamanka (Senedd) Wales ka 2026 haddii aad:

- Haddii aad tahay 16 jir ama ka weyn maalinta doorashada
- Aad iska diiwaangalisay codbixinta
- Aad ku nooshahay Wales isla markaana aad ka mid tahay kuwa hoos ku qoran:
 - muwaadin UK ama Irish ah
 - muwaadin Commonwealth ah oo haysta oggolaansho uu UK ku joogo
 - muwaadin ajnabi ah oo u qalma (oo ay ku jiraan muwaadiniinta EU)

Sida loo iska diiwaangeliyo codbixinta

Isdiiwaangelintu waa fudayd oo
badanaa waxay qaadataa 5 daqiiqo.

Sawir (scan) QR code-ka si aad online isaga diiwaangeliso


Haddii aad doorbidayso foom
warqad ah? Weydii golaha
deegaanka (local council).

Si aad isu diiwaangeliso, waxaad u baahan tahay:


- Lambarkaaga Caymiska Qaranka (National Insurance number) (haddii aad haysato)
- Cinwaanka guriga
- Taariikhda dhalashada

Waqtiga kama dambaysta ah ee isdiiwaangelinta:

Saqda dhexe (12:00 habeenimo), Isniin,
20-ka Abriil 2026



SIYAABAHA LOO CODEEYO



Si Toos ah

- Tag xarunta
codbixinta (polling
station) ee kuu dhow,
07:00 subaxnimo -
10:00 fiidnimo
- Lama rabo aqoonsi
sawir leh (photo ID)

Boostada

- Codsiga samee ugu
dambayn 21-ka Abriil
2026, 5:00 galabnimo
- Kadhka codbixinta ayaa
laguu soo diri doonaa
guriga
- Soo codee ugu dambayn
7-da May 2026, 10:00
fiidnimo

Wakiil

- Qof aad ku kalsoon tahay
ayaa adiga ku
codaynkara
- Codsiga samee ugu
dambayn 28-ka Abriil
2026, 5:00 galabnimo



Si aad u codsato cod-bixin boosto ama wakiil, ama aad u hesho macluumaad
dheeraad ah oo ku saabsan deegaankaaga doorashada (constituency) ama xarunta
codbixinta ee kuu dhow:

Kala hadal lambarkan 0800 3 280 280 ama scan garee QR code-ka.

Codbixintu waxy go'aamisaa cidda go'aamma ka gaarta:

Dugsiyada | NHS (Adeegga Caafimaadka Qaranka) | Guryeynta | Gaadiidka |
Golayaasha Deegaanka | Adeegyada Dadweynaha

Codkaagu wuxuu ka qayb qaataa qaabaynta mustaqbalka Wales.